WAR SAXAAFADEED MIISAANIYADDA
ONTARIO EE 2016

Maalgashiyada Ontario ee Abuurista Shaqada loogu talagalay Maanta Iyo Berrito

Dowladda Ayaa Ku Sii Wadda Qorshaheeda ay ku Kobcinayso Dhaqaalaha, Ku Abuurayso Shaqooyinka iyo Ku Dheellitirayso Miisaaniyadda gudaha 2017-18

WARARKA Febrawari 25, 2016

Maanta, Wasiirka Maaliyadda Charles Sousa ayaa sii daayay *Miisaaniyadda Ontario ee 2016: Shaqooyinka Maanta iyo Berrito,* oo sookoobaysa wajiga xiga ee qorshaha dowladda ee lagu abuurayo shaqooyinka iyo kobaca dhaqaalaha. In ka badan 600,000 oo shaqo ayaa la abuuray tan iyo dhaqaale hoos u dhicii Juun 2009. Ontario waxa la filayaa inay abuurto in ka badan 300,000 oo shaqooyin dheeraad ah dhammaadka 2019, oo markaa ka dhigi doonta wadarta abuurista shaqada in ka badan 900,000 oo shaqooyin cusub oo la heli doono in muddo 10-sano ah. Wasaaradda Maaliyadda ayaa saadaalinaysa koritaan Wax Soosaar Guud ee Gudaha (GDP) Ontario dhabta ah boqolkiiba 2.5 gudihii 2015 iyo 2.2 boqolkiiba 2016. Kobaca dhaqaalaha Ontario ayaa hadda ka tallaabo dheereynaysa koritaanka qaranka, oo hadda la filayaa inay ku sii waddo ahaanteeda kuwa ugu adadag Kanada labada sano ee soo socota.

Reer Ontario ayaa ka welwelsan xaaladda dhaqaalaha iyo sida ay iyaga iyo qoysaskooda u saamayn doonta. Sababtaas weeye waxa*Miisaaniyadda* horay loogu soo bandhigayo marka loo eego sannadihii hore, si ay qoysaska iyo meheradaha Ontario ay u arki karaan sida ay dowladdu u dhisayso qorshaheeda abuuritaanka shaqooyinka oo ay u kobcinayso dhaqaalaha, oo ay ugu samaysnayso dadka fursado iyo xasilloonaan ka sii badan.

Qorshaha dawladda ayaa ah u abuuritaan shaqooyin wanaagsan maanta beelaha Ontario oo idil iyada la maalgashado kaabayaasha iyo in dhaqaale leh kaarboon heer hoose ah oo ay wadaan meherado leh hindisaad, koritaan-sare iyo u-hoggaansanaan wax dhoofin. Waa maalgashiga hibooyinka iyo xirfadaha dadka, oo *Miisaaniyadda 2016* ayaa ka caawin doonta dad badan inay helaan oo ay abuuraan shaqooyinka mustaqbalka iyada oo ugu fidisa marin u helitaan waxbarashada kulliyad iyo jaamacad tayo-sare leh. Qorshaha ayaa waliba ka caawin reer Ontario inay haleelaan hawlgab ka xasilloonan badan.

Qorshaha dawladda ayaa dhabbaha toosan u saaran dheellitirka miisaaniyadda 2017–18.

Maalgashiga Hibooyinka iyo Xirfadaha Dadka

Itaalka shaqaalaha Ontario ee aqoonta sare leh ayaa ka mid ka mid ah awoodaheeda ugu waawayn. Si reer Ontario looga caawiyo hanashada kartidooda buuxda oo ay ugu guulaystaan dhaqaalaha koraya, dawladda ayaa u beddelysa gargaarka ardayga Ontario ee waxbarashada dugsiga sare inta ka dambaysa mid hufnaan leh, wakhatigana ku beegan oo u bartilmaamsan ardayda baahida ugu badan leh.

Dowladda ayaa abuuri doonta deeq dhiby, furan, oo horay laga bixiyo — Deeqda Ardayga Ontario (OSG) — oo billaabmi doonta sannad dugsiyeedka 2017-18. Nidaamka la soo jeedinayo hoosteeda, ayay kuliyadda iyo jaamacdda celceliska ah lacagta tacliinta lacag la'aan u noqon doontaa ardayda baahida lacageed leh ee ka soo jeeda qoysaska u dakhligoodu yahay $50,000 ama u ka hooseeyo, oo lacagta tacliinta ayaa waliba u noqon doonta mid ay awoodi karaan qoysaska dakhli-dhexaadka leh.

In ka badan 50 boqolkiiba ardayda ka soo jeeda qoysaska leh dakhliga $83,000 ama in ka hooseysa ayaa heli doona deeqo dib-uma-bixin ah oo ka badan lacagta tacliinta ee caadiga ah, oo arday kasta oo Ontario ayaan heli doonin iyaga oo u mara OSG in ka yar intay u mutaysan yihiin iyada oo loo maro Deeqda Lacagta Tacliinta Ontario.

Ardayda ka tirsan qoysaska leh dakhliga sannadlaha ah ee ka yar $50,000 ayna yeelan doonin deyn arday goboleed. Dowlladda ayaa waliba fidin doonta taageerada lacageed ee ardayda muddakarka ah iyo kuwa reerka leh, oo marin u helka amaahyo dulsaar la'aan iyo qiime jaban ah oo loogu talagalo qoysaska dakhliga dhexe iyo sare leh ayaa la kordhin doonaa iyadoo la yareynayo ku biirinta waalidka laga filayo.

Ardayda intooda ugu badan ayaa yeelan doonta deyn sidii hore ka yar markay hoos timaad nidaamka hadda, oo heerka ugu badnaan ee deynta Barnaamijka Taageerada Ardayga Ontario deynta ayaa loogu xaddidi doonaa $10,000 sannad ahaan qoysaska dakhliga-sare leh. Ontario ayaa ku sii wadi doonta u fidinta gargaarka lacageed ee loogu talagalay ardayda dibka u ka haysto dib u bixinta deymahooda arday.

Ku Dhisitaan Kaabayaal Maalgelinta Ugu Badan Taariikhda Ontario

Dhisitaanka iyo dib u cusboonaysiinta kaabayaasha dadwaynaha ayaa lama huraan u ah lagu xoojinta dhaqaalaha Ontario iyo abuurista shaqooyinka loogu talagalay maanta iyo berrito. *Miisaaniyaddan*, dowladda ayaa maalgelin doonta in ka badan $137 bilyan muddo ah 10ka sano ee xiga waddooyinka, buundooyinka, gaadiidka dadwaynaha, isbitaallada iyo dugsiyada. Taas waxay ku dambayn doontaa $160 bilyan in muddo 12 sano ah, laga soo bilaabo 2014–15, iyada oo ah maalgashigii ugu badnayd ee kaabayaasha dadwaynaha taariikhda Ontario.

Maalgelintan la qorsheeyay yaa taageeri doona in ka badan 110,000 oo shaqooyin sannad kasta, celcelis ahaan.

Gobolka ayaa wali haya dhabbahii lagu soo saari lahaa $5.7 bilyan ugu dambaynta iyada oo laga faa'iidayso qiimaha hantida ay dawladdu leedahay — iyada oo ka bdan $2.6 bilyan bilyan intii hore loogu saadaaliyay ee *Miisaaniyaddii 2014*. Faa'iidooyinka dakhliga saafiga ah ee laga helay hantiyada muddo dheer ka-faaiidaysiga ayaa loo-qoondeeyay Trillium Trust si ay uga caawiso saasamaalaynta gaadiidka dadwaynaha, kaabayaasha gaadiidka iyo kuwa kale ee muhimka ah.

Horumarinta Jawi Meheradeed oo Firrfircoon iyo Hindisaad leh

Si ay u kobciso dhaqaalaha oo ay u abuuro shaqooyin, qorshaha dawladda Ontario ayaa ku sii wada yaraynta kharashyada meheradda, xoojinta maalgashiga iyada oo loo marayo isbahaysiyada xeeladeed, iyada oo laga caawiyo meheradha inay caalamai noqdaan iyo in xoojiyo qaybaha adeegyada lacageed. Dawladda ayaa waliba soo saaraysa xeelad dhaqaale wadaagitaan la wadaago oo cusboonaysiinaysa xeeladda shirkadda bulsheed ee Gobolka.

Dhaqaalaha caalamiga ah u guuraya qiimaynta kaarboonka. *Miisaaniyadda 2016*ayaa u gogol haadhaysa inay Ontario xaraashdo fasaxyada xaddidan ee kaarbonka gudaha 2017. Sidaa awgeed, ayay dowladdu soo jeedinaysaa barnaamij xadaynta-iyo-ganacsiga ah si ay uga caawiso Ontario qanciska bartilmaayadeeda yarayna naqaska aqal-cagaarka (GHG), iyo si ay u abaalmariso shirkadaha hindisaha leh iyo in la hubiyo in qoysaska iyo meheraduhu ku dhex magoolaan u kalaguurka dhaqaalaha kaarbonta-hooseeya leh. Dhammaan faa'iidooyinka ka soo baxa barnaamijka xadaynta-iyo-ganacsiga, oo la saadalinayo inay noqon doonto $1.9 bilyan gudaha 2017, ayaa loo isticmaali doonaa maalgashiga mashaariicda cagaaran.

Dawladda ayaa waliba ku sii wadi doonta inay soo bandhigto Hindisaheeda Koridda Meheradda, oo ah xeelad shan sano iyo $ 400 milyan ah laguna dardargelinayo doorbidka Gobolka ee ah koridda-sarraysa, dhaqaalaha hindisaadda leh iyo ka caawinta meheradaha inay koraan. Waxa kale oo ay waliba casriyayn doontaa nidaamka sharciyaynta iyo hoos u dhigga qiimaha meherad ku yeelashada gobolka dhexdiisa.

Xoojinta Xasiloonaanta Hawlgabka

Si loo yareeyo faraqa kaydsiyada hawlgabka, dawladda ayaa hirgelin doonta Qorshaha Benshinka Hawlgabka Ontario (ORPP), taas oo ka caawin doonta dadka shaqeeya ee reer Ontario inay u keydsadaan hawlgabka. Dawladda ayaa waliba ku sii jeedda inay ku guulaysato yoolkeeda ah hubinta in, ilaa sannadka 2020, dhammaan shaqaalaha Ontario ee mutaystay ay ku caynsanaan doonaan qorshe goobta shaqada ah oo u dhigma ama ORPP. Si loo xaqiijiyo hirgelin guul iyo fudayd leh, ORPP Administration Corporation ayaa bilaabi doonta nidaamka xaqiijinta iyo qoridda loo-shaqeeyaha gudaha 2017, iyada oo loo shaqeeyaha iyo shaqaaluhu ay bilaabi doonan ku biirintooda ururinta bilowga 2018.

Isla markaa, ayay Ontario wali u heellan tahay xal u helitaan u oggolaan doonta baahida shaqaalaha Ontario in lagu hoos qanciyo qaab-guud oo heer qaran ah. Dowladda Ontario ayaa iskaashi ahaan ula shaqayn doonta dawladda sare, gobollada iyo carriyada si looga horumar looga sameeyo xoojinta Qorshaha Benshinka Kanada (CPP) oo wax ka qabanaysa baahida hawlgabka waayada soo socda. Ujeeddada ugu wayn ayaa ah sidii loo eegi lahaa siyaabaha loola kulmi lahaa yoolalka ORPP qaab-guud horumasan oo CPP ahaan, isla markaa iyada oo la dhowrayo kartida lagu hirgalinayo ORPP ah, haddii taasi aanay noqon suurtogal.

Dhisidda Bulsho Cadaalad Ah

Gobolka ayaa siiya dadka fursadaha iyo taageerooyinka ay ugu baahan yihiin inay hantaan kartida waxqabadkooda oo buuxda.

Dowladda ayaa u heellan inay beddesho adeegyada si dadka qaba naafada koriinku ay madax-bannaanaan ka sii badan ay u yeelan karaan. Dawladda ayaa sidoo kale cusboonaysiinaysa Xeeladda Guriyaynta La-Awoodi karo ee Muddada-dheer si ay ugu sii waddo wax ka beddelka nidaamka guriyaynta iyo hoy la'aanta Ontario, iyada ku nuuxnuuxsanaysa dheefaha dabacsanaanta iyo raritaanka leh ee wax uga qabanaysa baahida isbeddeleysa ee guriyaynta shaqsiga.

Gobolka ayaa hore ugu sii socoda ku dhaqaaqa Xeeladda Baahida Gaarka ah si ay uga caawiso carruurta iyo dhallinta baahiyada gaarka ah iyo isku murgisanaanta leh inay ugu helaan adeegyada si wakhtigeeda ah oo wax ku ool ah guriga, dugsiga iyo beesha marka lagu dhex jiraba iyo kolba markay u kala-guuryaan qaangaarnimada. Ontario ayaa sidoo kale ku samaynaysa maalgelin ah $333 milyan ilaa shan sano sidii dib loogu habayn lahaa oo horay loogu marin lahaa adeegyada ootismka.

Gudaha 2016, dowladda ayaa sii horumarin doonta maalgelinteedii horeee gargaarka bulshada iyada oo u kordhinaysa saamiyada ilaa boqolkiiba 1.5 qaangaaraha qaata Ontario Works iyo dadka naafanimada lehee ku tiirsan Barnaamijka Taageerada Naafanimada Ontario. Gobolka ayaa sidoo kale siin doona u kordhin kuwa leh saamiyada gagaar bulsheedka ugu hooseeya leh — dadka kalida ah ee aan carruurta lahayn ee qaata Ontario Works — iyada wadarta u kurdhintooda ka dhigayasa $25 bil kasta, taas oo ah in ka badan $100 bishii kasta badan intii ay helayeen sannadkii 2012.

Iyada oo loo marayo qorsheyaasha sida Walking Together: Xeelad muddo=dheer ah oo ah oo lagu Joojinayo Colaadda Lagula Kaco Haweenka Asaliga ah iyo ku kaca talooyinka Guddiga Runta iyo Dib-u-Heshiinta Kanada, dawladda ayaa horumarinaysa xaaladaha bulsheed iyo fursadaha dhaqaale ee loogu talagalay dadyowga Asaliga ah.

Dawladda ayaa waliba ku sii wadi doonta beddelidda nidaam daryeel caafimaad wadareedka Ontario si loogu siiyo reer Ontario marin dhakhso leh daryeelka saxda ah, haatan iyo mustaqbalkaba. Arrinta murtideeda waxa ka mid ah u kordhin raasamaalayn isbitaallo ilaa $345 milyan ah; hoos u dhigga wakhtiyada sugitaanka adeegyada muhiimka ah, abuurista daryeel aasaasi furan oo koox ku salaysan; ka dhigi doonta in daryeel dheeraad ah lagu helo guriga iyo beeshaba; soo jeedin in tallaalka shingles ay ku heli karaan lacag la'aan dadka waayeelka ah ee da'doodu 65 ilaa 70 tahay ee mutaysta — iyada oo ay uga kaydsanto $170 kharasyada jeebkoodka ka bixi lahaa, iyo maalgashi dheeraad ah oo $75 milyan deggenaanta hosbasyada iyo Daryeel laxaw yaraynta oo beesha salka ku haya, wadar ahaan maalgashi qiyaastii ah $155 milyan ilaa saddex sano.

Ka Dhigidda Nolosha Maalin Kasta Mid Fudud

Dawladda ayaa soobandhigaysa hindiseyaal badan lagu horumarinayo nolol-maalmeeda reer Ontario. Kuwaas waxa ka mid ah naaquska khidmadaha gaadiidka lagu dhigto isbitaalka ee loogu talagalay isticmaalayaasha soo noqnoqdka leh, ka takhaluska khidmadda $30 ee qaac-siidaynta Drive Clean, ka caawinta kharashyada korontada iyo tamarta, yaraynta saamiyada caymiska gaadiidka iyo u isticmaalka teknoolojiyadda in si ka habboonaan badan loo bixiyo adeegyada dadwaynaha.

Dowladda ayaa kor u qaadday u habboonaanta iyo u sahlanaanta reer Ontario iyada oo si xilksanimo leh loo fidiyay iibinta biirta dukaammada cuntada, oo haddana waxa waliba lagu fidinayaa ku iibinta khamri canabka. Markay tahay dayrta 2016, ilaa 70 dukaammo cuntada ayaa u sharciyaysaan doona iibinta khamri canabka, biirta iyo saydarka Kanada oo dhan. Khamri canabka waxa ugu dambaynta laga heli doonaa ilaa 300 dukaammada cuntada ah.

Maamulitaan Maaliyadeed Adag

Dawladda ayaa ku sii wadda inay maalgashato dhaqaalaha, dadka iyo mustaqbal caafimaadqab, nadiif iyo barwaaqo kaarbon-hooseeya leh, isla markaa iada oo ka adkaanaysa bartilaamdyadeeda maaliyadeed. Maalgashiyadan ayaa waxtar u lahaan doona horumarinta adeegyada dadwaynaha ee reer Ontario ku tiirsan tahay, iyo iyada kordhisa koritaanka. Shaqooyin wanaagsan iyo dhaqaalaha koraya ayaa ah dariiqyada ugu fiican ee lagu taageerayo qoysaska reer Ontario oo dhalinaya dakhliyo saaran dhabbaha dheellitirka iyo barwaaqo muddo-dheer ah.

Dawaladda ayaa saadaalineysa dhifisid $5.7 bilyan gudaha 2015–16 — taas oo ah horumar $2.8 bilyan ah marka la barbardhigooo saadaalintii *Misaaniyaddii 2015* iyo $ 1.8 bilyan marka la barbardhigo bartilmaameedkii lagu soo saaray gudihii *2015 U Aragga Dhaqaalaha Ontario iyo Dib u Eegga Maaliyadeed*. Sidoo kale waa horumar ah $ 4.6 bilyan marka loo eego difisidkii 2014–15 ee ahayd $10.3 bilyan.

Gobolka ayaa dhabbihii toosnaa ugu taagan inuu ka adkaado bartilmaameedka difisid sananadkii toddobaad isku xigxig ahaa. Iyada oo ka adkaaday bartilmaameedyada maaliyadeed, ayuu dhifisidka ururSamay ee Gobolku hoos uga dhacay $30 bilyan halkii u joogi lahaa haddaan waxab laga qaban.

Dawaladda ayaa saadaalineysa dhifis ah $4.3 bilyan gudaha 2016–17, iyada oo muujinaysa horumar ah $ 0.5 bilyan marka la barbardhigo saadaashii *Miisaaniyaddii 2015*. Dowladda ayaa waliba saadaalineysa inay qancin doonto ballanqaadkeedii in lagu soo laabto dheellir 2017–18 — iyada oo ah natiijada qorshe lagu baabi'inayo difisidka oo markii ugu horraysay lagu soo bandhigay *Miisaaniyaddii 2010*. Iyada oo muujinaysa inay maamulitaanka deynta gobolku

waaritaan leedahay, ayaa saafi ahaan deynta GDP laga filayaa inay ugu sarrayn noqoto boqollay 39.6 gudaha 2015–16, oo sinnaato gudaha 2016-17 markaana hoos u dhacdo 2017-18.

Iyada oo la filayo inuu dhaqaalahu ku sii wado koritaanka iyo u heellanaanta dowladda ee socotaa lagu beddelayo barnaamijyada iyo adeegyada dowladda, Ontario ayaa saadalinaysa inay dhellitirnaan ahaato gudaha 2018–19.

XIGASHO

“Qorshaha dhaqaale ee Gobolka ayaa taageera shaqooyin wanaagsan maanta beelaha Ontario oo idil iyada la maalgashado kaabayaasha iyo in dhaqaale leh kaarboon heer hoose ah oo ay wadaan meherado leh hindisaad, koritaan-sare iyo u-hoggaansanaan wax dhoofin. Qorshaha ayaa maalgaliya hibooyinka iyo xirfadaha dadka inay helaan oo ay abuuraan shaqooyinka mustaqbalka, iyada oo ugu fidisa marin u helitaan waxbarashada kulliyad iyo jaamacad tayo-sare leh. Qorshaha ayaa waliba ka caawiya dhammaan reer Ontario inay haleelaan hawlgab ka xasilloonan badan.”

— Charles Sousa, Wasiirka Maaliyadda

XAQIIQOOYIN DHAKHSO LEH

- Qiyaasta GDP Ontario ee dhabta ah ayaa kor u kacay boqolkiiba 2.5 gudahii 2015, iyada oo ka badisay celceliska qaranka.
- Gobolka ayaa qorshaynaya inuu ku siiyo $12 bilyan ilaa 10 sano deeqyo kharashyo isbitaalladu si ay ugu sii wataan dhisitaanka kaabayaasha lagama maarmaanka ah. Gobolka oo dhan, qiyaastii 35 mashaariic isbitaal oo waawayn ayay ka socdaan dhismahoodu ama ku jiraan maraxalado kala duwan oo qorshayn.
- Gobolka ayaa siinaya $3 bilyan oo deeqyo kharashyo ah ilaa 10 sano hay'adaha tacliinta sare si ardayda loogu siiyo marin barnaamijyo tayo sare leh oo u dhow guriga oo ay gacan ka geysato dhisidda dhaqaale ka sii xoog badan.
- Itaalka shaqaalaha Ontario ee aqoonta sare leh ayaa ka mid ka mid ah awoodaheeda ugu waawayn. Markay ahayd 2014, boqolkiiba 66 dadka qaangaaraha ah ayaa lahaa caddayn tacliin sare, iyada oo ka badnayd boqolkiiba 56kii 2002— kana sarraysa saamiyada dal kasta oo ku jira Ururka Iskaashiga iyo Horumarka Dhaqaalaha.
- Si loo helo ra'yi dhiibashada dawaynaha *Miisaaniyadda Ontario ee 2016*, dowladda ayaa samaysay la-tashiyo miisaaniyadda-kahor ahaa dhammaan gobolka. Kuwaas waxa ka mid ahaa 20 kulano qof ahaan ah oo miisaaniyadda kahor ahaa 13 magaalo oo lala yeeshay 700 oo qof, laba hoola teelefoon oo la gaarsiiyay 52,000 oo reer Ontario ah, ku dhawaad 500 soo gudbin qoran oo la helayiyo la-tashy onlayn lagula yeeshay isticmaalayaal 6,500 ah iyada oo loo maray barta interntka Budget Talks.

ILO DHEERAAD AH

Akhriso *Misaaniyadda Ontario ee 2016*

Akhriso qudbadda Misaaniyadda

Akhriso sooyaalka macluumaadka ku saabsan *Misaaniyadda 2016 ee Ontario*:

- Horumarinta Marin u Helidda Tacliinta Sare
- Dhisidaa Kaabayaasha Berrito Hadda
- Kobcinta Dhaqaalaha iyo Abuurista Shaqooyinka loogu talagalay Berrito
- Maalgashiga dhaqaale Kaarboon-hoose
- Ka Dhigidda Nolosha Maalin Kasta Mid Fudud
- Eegitaanka Dhaqaalaha Ontario
- Aragtida Miisaaniyadda Ontario
- Waxa Ka Beddelka Daryeelka Caafimaadka
- Ka Caawinta Maaraynta Qiimayaasha Korantada